

Haddii Dufanka Dhiigga(a)uu Sareeyo: Maxaa Xiga?




Hagahan fudud ayaa kaa caawinaya inaad kala hadasho dhakhtarkaaga natijoooyinkaaga.

1. Maxay tahay waxa aan u baahanahay inaan ogaado?

Inaad ogaato inaad qabto dufanka Dhiigga(a) ama Lp(a) oo sareeyo, nooc ka mid ah dufanka dhiigga, waa wax lala yaabo sababtoo ah badanaa ma lahan wax calaamado ah. Adiga keli ma tihid — qiyaastii 1 ka mid ah 5 qof adduunka oo dhan ayaa leh Lp(a) oo sareeya. Lp(a) oo sareeya waxay kordhin kartaa halista cudurrada wadnaha iyo istaroorga, laakiin halista guud ee aad leedahay waxay ku xiran tahay arrimo badan, kaliya ma aha mid ku xiran Lp(a). Waxaa jira tallaabooyin aad qaadi karto si aad u ilaaliso wadnahaaga iyo maskaxdaada. Inkastoo aan weli la helin daawo si gaar ah loogu yareeyo Lp(a), qaadashada nolol caafimaad leh iyo xakameynta arrimaha kale ee halista waxay kaa caawin kartaa ilaalinta wadnaha iyo maskaxdaada. Maaddaama Lp(a) uu inta badan la iska dhaxloa, xubnaha qaraabadaada kuu dhow waxaa fiican in la baaro.

Heerka Lp(a)-geyga: _____

Su'aalahan waxay kaa caawin karaan inaad hagto wadahadalka aad la yeelanayso xirfadlahaaga daryeelka caafimaadka xilliga booqashadaada.



Macluumaad ku saabsan Halistayda

Heerka Lp(a)-geygu muxuu kaga dhigan yahay halista guud ee cudurka wadnaha ama istaroorga?

Sidee tirooyinka kale ee dhiigga (kolestaroolka, cadaadiska dhiigga, sonkorta dhiigga) u saameeyaan halistayda?

Ma waajibbaa in waalidkayga, walaalahay, ama carruurta la baaro?

Tani ma la xiriiri kartaa xaalad qoys, sida hypercholesterolemia qoyska (FH)?

Kuwo kale:



Macluumaad ku saabsan Qorshahayga Daryeelka

Maxaan hadda sameyn karaa si aan u yareeyo halistayda cudurka wadnaha iyo istaroorga?

Ma u baahanahay inaan bilaabo ama beddelo daawooyin qaar?

Sidee caafimaadka wadnahayga loo ilaalin doonaa waqti ka dib?

Ma jiraan kooxo taageero ama kheyraad loogu talagalay dadka leh Lp(a) oo sareeya?

Kuwo kale

(Isticmaal bogga dambe si aad ugu qorto waxyaabaha ka soo baxay booqashadaada — waxa la sameeyo, qorshayaasha raaca, tallaabooyinka qoyska, yoolalka, ama xusuusinta)

Fahanka heerkaaga Lp(a) waa talaabo muhiim ah oo lagama maarmaan u ah daryeelka wadnahaaga.



Tallaabooyinkayga Xiga

Meeshan waxaa loogu talagalay in lagu qoro waxyaabihii ka soo baxay booqashada maanta.



Waxa aan maanta bartay



Yoolalkayga



Su'aalo ama xusuusinno:



Tallaabada Xigta ee Aan Qaadi Doono

- Inaan qorsheeyo booqasho dabagal ah
- Inaan sameeyo baaritaanno ama tijaabooyin shaybaar
- Inaan kala hadlo dhakhtarkayga qorshaha daryeelka
- Kuwo kale: _____



Arrimaha Qoyska

Yaa qoyskeyga ka mid ah ayaa u baahan kara baaritaanka ama dabagalka?

